



Dhaafidda Daynta Soomaaliya

Tubta Nabadda, Yaraynta Saboolnimada iyo Horumarka

Iyada oo ay keentay natijjada ka dhalatay colaadaha daba dheeraaday iyo abaaraaha wax burburinaya ee soo noqnoqday, Soomaaliya waa dal ka mid ah wadamada Afrika ee ka hooseeya Saxaaraaha kuwooda ugu xasillooni yar uguna horumarka yar. Kadib burburkii dawladdii dhexe ee 1991-dii, wadanku waxa uu galay colaado rabshado wata iyo kacdoonno, saboolnimo baahsan oo adag, cunno yari daran, maamul-xumo iyo xasillooni-darro siyaasadeed, hoos-u-dhac dhaqaale, xad-gudubyo ka dhan ah xuquuqda aadanaha iyo masiibooyin dabiici ah oo soo noqnoqday sida abaaraaha iyo daadadka. Soomaalidu ilaa hadda mahaystaan adeegyo ammaan, daryeel caafimaad, waxbarasho, biyo nadiif ah oo la caboo ammaan ah iyo fursadaha shaqada oo ah kuwo aad u kooban. Dawladda Federaalka ee Soomaaliyana waxay leedahay khayraad aad u yar oo ay ku dabooli karto baahiyaha degdega ah ee dalka ka jira.

Doorashooyinkii baarlamaanka iyo tii madaxwaynaha ee 2012-kii waxay keentay in dib loo cusboonaysiyo aqoonsi caalami ah oo la siyo DFS iyo in ay hab wax dhisid ah dib-ula falgasho beesha caalamka. Tan waxay si kastaba ha ahaatee keentay, in ay dhaxasho daymo dibadda ah oo is-gaargaaray xilliyadii dawladii hore ee Soomaaliya, taasu waxay dalka ku reebtay xaaladda in uu noqdo dal sabool ah oo si culus u qaamaysan loona haysto dul-saar dib-u-dhac (arrears) oo ballaaran ay keentayna daymaha ay ku lahaayeen dayn-bixiyayaal laba-dhinac ah iyo kuwo dhinacyo badan laguna leeyahay dayn dibadda ah oo dhan US\$ 4.6 oo bilyan (dhammaadkii 2017-ka). Waxaa ka dhashay daynta dibadda ah ee dalka lagu leeyahay iyo dul-saarta dib-u-dhaca ballaaran ee bixinta daymaha in ay ka xanibto helitaanka khayraad lacageed oo si aad ah loogu baahanyahay oo ay ka hesho beesha caalamka, taas oo muhiim u ah dib-u-dhiska iyo horumarka Soomaaliya.

Dadajinta, Dayn dhaafid dhammaystiran

Si wax looga qabto culayska daymaha dibadda ah ee Soomaaliya iyo in dalka loo suurto galiyo helitaanka daymo fudud, wadanku wuxuu u baahnaan doona in uu::

- dhammayo dul-saarta dib-dhacyada oo ay ku leedahay IMF, Bankiga Adduunka iyo Baniga Horumarinta Afrika;
- Dhammaystiro geeddi-socodka Soojeedinta Dalalka

Saboolka ah ee Sida Culus U Qaamaysan (HIPC) iyo soojeedinta dhinacyada badan leh ee Dayn Cafinta(MDRI);

- Helo dayn dhaafid buuxda oo laga helo dhammaan dayn-bixiyayaasheeda dibadda.

Soomaaliya muhiim bay u tahay in la dardargaliyo geeddi-socodka dayn cafinta si loo helo khayraad cusub oo wax looga qabto dib-u-dhiska iyo horumarka loguna dhiirrigaliyo maalgashi inta ka wayn oo dalka lagu sameeyo. Sidoo kale waxaa muhiimad wayn leh in ay Soomaaliya ka hesho dayn dhaafid dayn-bixiyayaasheeda dibadda si looga baaqsado u adeegidda daymaha dibadda kadib marka la helo dayn cafinta iyada oo loo marayo Soojeedinta Dalalka Saboolka ah ee Sida Culus U Qaamaysan (HIPC),maadaama ay u adeegidda daymaha dibadda ay ka weecinayso khayraadka yar ee horumarka loo adeegsan lahaa. Taasu waxay uga baahantahay dayn-bixiyayaasha dibadda ah ee Soomaaliya in ay dardargaliyan geeddi-socodka dayn cafinta iyo in ay dalka siyyaan dayn dhaafid dhammaystiran. Guud ahaan, dardargalinta geeddi-socodka dayn cafinta iyo siinta dayn dhaafid dhammaystiran wuxuu xoojindoona dib-u-soo noolaynta nabadda iyo xasillooni siyaasadeed wuxuuna dhiirigalindooda horumarka, taas oo yaraynaysa halista laga qabo in uu dalku dib ugu laabto colaad.

Waxay Koox kala duwan oo ah jilayaasha bulshad rayidka ah ee heer caalami iyo heer qaran kuna middaysan daladda Isku tagga Ururda Aan Dawliga Ahayn ay soo jeedinayaan taageeradooda ku aadan u qareemidda iyo u ololaynta si loo helo dayn dhaafid dhammaystiran oo dhakhsa ah. Kooxdani waxay u xilsaartay u qareemidda iyo ujeedada siyaasad kooban (policy brief) oo lagu magacaabo Dhaafidda Daynta Soomaaliya: Tubta Nabadda, Yaraynta Saboolnimada iyo Horumarka. Ujeedada siyaasadda kooban waxay ka koobantahay:

- Soo koobid ku aadan geeddi-socodyada farsamo ee dhammaynta dul-saarta dib-u-dhaca, HIPC, MDRI, iyo wixii ka daynbeeya dayn cafinta HIPC, taas oo ay ku jiraan horumarka illaa hadda ay samaysay Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya;
- Doodo maangal ah akhlaaqna ah oo ku aadan sidii loo dadajin lahaa dayn dhaafidda; iyo
- Talooyin waaqici ah oo ku socoda Dawladda, hay'adaha lacagta dunida iyo dalalka dayn-

bixiyayaasha laba-dhinac ah.

Kala xiriir: info@somaliangoconsortium.org

Ayagoo taageero
ka helayo:



**American Friends
Service Committee**



**SOMALIA
NGO
CONSORTIUM**



OXFAM



الهلال الأحمر القطري
Qatar Red Crescent



Save the Children

World Vision